# Siyaasadda Gargaarka Dhaqaale

BJC Health ("BJC") waxay rabtaa inay ka caawiso bukaannada aan lahayn caymis caafimaad ama u baahan caawimo bixinta biilasha isbitaalka. Iyadoo ah urur daryeel caafimaad oo aan macaash doon ahayn, BJC iyo isbitaalladeenna xubnaha ka ah iyo ururrada adeegyada caafimaadku waxay dan ka leeyihiin bukaannada iyo bulshooyinka aan u adeegno iyada oo loo marayo caafimaad wanaagsan iyo daryeel caafimaad oo ka sii wanaagsan.

Shaqaalaheenna waxay kaa caawin karaan:

- Codsashada caymis caafimaad adigoo maraya Goob-suuqeedka caymiska caafimaadka
- Codso kaalmada Medicaid
- Go'aami haddii aad u qalanto gargaarka dhaqaale ee BJC

## Gargaarka Dhaqaale ee BJC

Ugu horreyn, xaaladdaada dhaqaale saamayn kuma yeelan doonto daryeelkaaga. Dhammaan bukaannada waxaa loola dhaqmaa si ixtiraam iyo caddaalad leh. Bukaannada buuxiya shuruudaha dakhliga qaarkood waxay u qalmi karaan gargaarka dhaqaale ee BJC, oo ay ku jiraan khidmadaha isbitaalka oo la dhimay iyo qorshayaal lacag-bixineed oo muddo dheer ah oo aan dulsaar lahayn. Bukaannada u qalma gargaarka dhaqaale waxaa laga qaadi doonaa lacag ka yar tan guud ahaan laga qaado dadka leh caymis daboolaya daryeelkaas. Macluumaad ku saabsan lacagaha guud ahaan la qaado iyo sida loo xisaabiyo ayaa laga heli karaa adigoo nala soo xiriiraya adigoo adeegsanaya xogta xiriirka ee ku taal hoose ee boggan.

Haddii aad caymis leedahay oo aad qabto su'aalo ku saabsan daboolkaaga ama heerka faa'iidooyinkaaga, fadlan la xiriir bixiyahaaga caymiska. Bukaannada aan caymiska lahayn waxay si toos ah u heli doonaan qiimo-dhimis boqolkiiba 40 ah khidmadaha lagu dalacay waxaana loo tixgelin doonaa kaalmada. Iyadoo ay ku xiran tahay nooca adeegga iyo heerka gargaarka dhaqaale, waxaa laga yaabaa in loo baahdo bixinta qayb ka mid ah lacagta. Waxaan ku siin karnaa Jadwalka Dakhliga iyo Qiimo-dhimista ee Siyaasadda Gargaarka Dhaqaale marka aad codsato, kaas oo muujinaya qaddarrada bixinta.

Oggolaanshaha gargaarka dhaqaale wuxuu dhaqan galayaa muddo 12 bilood ah laga bilaabo taariikhda oggolaanshaha. Bukaannada helaya adeegyo muddadan gudaheeda waa inay nagu wargeliyaan booqashada iyagoo nala soo xiriiraya iyada oo loo marayo xogta xiriirka ee ku taal hoose ee boggan si gargaarka dhaqaale loogu dabaqo.  Ka-reebitaannada shuruudaha u-qalmitaanka gargaarka dhaqaale waxaa loo tixgelin doonaa si kiis-kiis ah.

## Codsashada Gargaarka Dhaqaale

Waxaad codsan kartaa gargaarka dhaqaale wakhti kasta—ka hor, inta lagu jiro ama ka dib daryeelkaaga, ilaa 240 maalmood ka dib biilkaaga ugu horreeya. Waxaan ku soo diri doonnaa macluumaad la socda biilkaaga oo ku saabsan sida loo codsado kaalmada. Foomamka codsiga ayaa sidoo kale la heli karaa marka la codsado xarun kasta oo BJC ah iyo mareegahayaga BJC.org ama SaintLukesKC.org. Codsigu wuxuu u baahan yahay caddeyn dakhli sida warqadda canshuur celinta dakhliga ama warqadda mushaharka. Tusaalooyin dukumeenti ah oo loo isticmaali karo caddeynta dakhliga waxaa laga heli karaa foomka codsiga.

Bukaannada ku jiray Medicaid lixdii bilood ee la soo dhaafay si toos ah ayay ugu qalmaan gargaarka dhaqaale ee adeegyada caafimaad ee aanu daboolin Medicaid. (Ka-reebitaanka kaliya waa haddii diiwaangelintii hore ee Medicaid ay ahayd sabab la xiriirta uur. Xaaladdaas, weli waad codsan kartaa Gargaarka Dhaqaale.)

Intaa waxaa dheer, bukaannada waxaa loo oggolaan karaa gargaarka dhaqaale iyadoo lagu salaynayo hab falanqayn caadi ah oo qiyaasa xaaladda dhaqaale iyo/ama bulsho-dhaqaale ee bukaanka. U-qalmitaanka noocan gargaarka ah si toos ah uguma qalmo bukaanka gargaarka akoonno mustaqbalka.

## Shuruudaha Caafimaad ee Gargaarka Dhaqaale

Isbitaallada BJC waxay, iyada oo aan wax ka-reebis ah jirin, siin doonaan daryeel xaaladaha caafimaad ee degdegga ah dhammaan bukaannada doonaya daryeelkaas, iyadoon loo eegin awooddooda bixinta ama u-qalmitaanka gargaarka dhaqaale, si waafaqsan shuruudaha Emergency Medical Treatment and Active Labor Act (EMTALA, Sharciga Daaweynta Caafimaadka Degdegga ah iyo Foosha Firfircoon).

Gargaarka Dhaqaale waxaa loo heli karaa oo keliya adeegyada degdegga ah iyo kuwa caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah. Ma khuseeyo habraacyada aan degdegga ahayn sida qalliin qurxinta. Sidoo kale ma khuseeyo qaybta adeegyadaada ee ay bixiyeen dhinac saddexaad sida shirkad caymis ama barnaamij dowladeed.

Gargaarka Dhaqaale waxaa heli kara bukaannada ku nool Kansas, Missouri, iyo Illinois, iyo dhammaan bukaannada helaya daryeel goobaha Hay'adda Qaranka ee Adeegga Caafimaadka (National Health Service Corps, NHSC) iyadoon loo eegin halka ay degan yihiin. Goobaha NHSC ee BJC HealthCare waxaa ka mid ah Missouri Baptist Sullivan Hospital, Bourbon Medical Office, Cuba Medical Office, Steelville Medical Office, iyo Sullivan Medical Office; iyo Parkland Health Center Medical Clinic. Goobaha NHSC ee Saint Luke's waxaa ka mid ah Allen County Clinic–Iola, Anderson County Family Care Center, Hedrick Family Care Clinic, Hedrick Medical Center, Hedrick OB GYN Associates, Saint Luke's Mercer County Clinic, Wright Memorial Hospital, iyo Wright Memorial Physicians Group.

Liiska bixiyeyaasha aan ku jirin Siyaasadda Gargaarka Dhaqaale ee BJC waxaa laga heli karaa adigoo nala soo xiriiraya adigoo adeegsanaya xogta xiriirka ee ku taala boggan hoostiisa.

## Hagayaasha Dakhliga ee Gargaarka Dhaqaale

Qaddarka gargaarka dhaqaale ee aad hesho wuxuu ku salaysan yahay xogta Federal Poverty Level (FPL, Heerka Saboolnimada Federaalka) ee ay dejiso dowladda Mareykanka sannad kasta. Si aad ugu qalanto qiimo-dhimis, dakhliga qoyskaaga waa inuusan ka badnaan saddex jeer Heerka Saboolnimada Federaalka (boqolkiiba 300). Waxaan ku siin karnaa Jadwalka Dakhliga iyo Qiimo-dhimista ee Siyaasadda Gargaarka Dhaqaale marka aad codsato, kaas oo muujinaya heerarkan dakhliga. Marka laga soo tago dakhligaaga, qiimo-dhimistu waxay sidoo kale tixgelin doontaa tirada qoyskaaga. Bukaannada leh dakhli qoys oo ka badan $100,000 sannadkii uma qalmaan gargaarka dhaqaale ee BJC, iyadoon loo eegin tirada qoyska.

**Fadlan xor ayaad u tahay inaad wax ka weydiiso Gargaarka Dhaqaale. Waxa aanu halkan u joognaa in aanu ku caawino.**

Dadka degan Illinois ee aan caymiska lahayn ee helaya adeegyo Alton Memorial Hospital, Memorial Hospital ee ku yaala Belleville, iyo Memorial Hospital ee ku yaala Shiloh waxay u qalmi karaan qiimo-dhimis dheeraad ah iyadoo la raacayo Illinois Hospital Uninsured Patient Discount Act (Sharciga Qiimo-dhimista ee Bukaannada Aan Caymiska Lahayn ee Isbitaallada Illinois).

### Hagayaasha Dakhliga ee Dhacdooyinka Masiibada ah

Haddii ay dhacdo xaalad caafimaad oo masiibo ah, bukaannada aan caadiyan u qalmin Gargaarka Dhaqaale waa la siin doonaa kaalmo. Xaaladahan gaarka ah, mas'uuliyadda lacag-bixinta ee bukaanka muddada 12 bilood ah kama badnaan doonto boqolkiiba 20 dakhliga sanadlaha ah ee qoyska.

### Fadlan Nala Soo Xiriir

Waxaad heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Siyaasadda Gargaarka Dhaqaale ee BJC, siyaasadaha la xiriira, iyo foom codsi, ama waxaad samayn kartaa codsi si aad u hesho ogeysiis qoraal ah ama isgaarsiin elektaroonik ah adigoo la hadlaya wakiil ka tirsan Patient Services ama adigoo wacaya:

- BJC HealthCare lambarrada 314-362-8400 ama 855-362-8400
- Saint Luke's lambarrada 816-932-5678 ama 888-581-9401
- St. Louis Children's at CoxHealth lambarrada 417-815-8846 ama 833-345-1395. Macluumaadka iyo foomamka codsiga ayaa sidoo kale laga heli karaa BJC.org. ama SaintLukesKC.org.

**Fadlan xor ayaad u tahay inaad wax ka weydiiso Gargaarka Dhaqaale. Waxa aanu halkan u joognaa in aanu ku caawino.**